Sharci asaasida ee bangiga puntland photocopy


# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

***DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA***

لولاية أرض بونت الصومالية

Sannadka 2^aad Garoowe, 15 JUNE LAM, 6

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA جريدة شهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

---

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. **Qiimaha qoritaanka F.R.** halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

---


TUSMADA


**Qaybta Koowaad**

**SHARCI**

**Sharci l. 9. ee Juun 2000** kuna saabsan Sharciga Aasaasiga ah ee Bankiga Dawladda Puntland ............ **Bogga 49 - 64**

Qaybta Labaad

**Xeer**

**Xeer Madaxweyne L. 1 ee Abriil , 24,2000** kuna saabsan Magacaabida Gudiga Dastuurka ee Xukuumadda ............ **Bogga 65**

**Qaybta Saddexaad**

**Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.**

Waxba ma leh

بنك دولة بنتلاند الصومالية

# Sharciga Asaasiga ah ee Bankiga Dawladda Puntland.
# The Constitutive law of the state Bank of Puntland.

## Qaybta 1aad
### *Qodobka 1aad*
### *Fasiraadda Sharcigan*

- Bangiyada idman: waxaa loola jeedaa Bangiyada kale ee loo fasaxay in ay adeegyada iyo Hawlaha Bankiga ka qabtaan Dalka Puntland.
- Bank : waxaa weeye bangiga Dawlad Goboleedka Puntaland.
- Guddi : waxaa loola jeedaa xubnaha sare ee Maamulka Bangiga ***(organs of the Bank).***
- Wasiir : waxaa Weeye Wasiirka Maaliyadda ee Puntland.
- Hay'adaha Maaliyadda ee cayiman waa kuwo aan Banki ahayn ee Bankigu u cayinay lacag bixin sida ujeeddada sharcigan.
- Unugyada Dadweynaha ee cayiman: waxaa weeye Dawladaha Hoose, Hay'adaha madaxa banaan, ama Rukun Bankigu u sameeyo, isla ujeeddada qaanuunkan.
- Guddoomiye : waxaa weeye Mas'uulka ugu sareeya Maamulka Bangiga.
- Xubin :waxaa weeye Mas'uul ka mid ah Maamulka Bankiga.
- Amaah-wade :waxaa loola jeedaa dukumenti qaansheegte ah ama gashiyo sida ***(cambiale)*** iyo waxa loo yaqaan ***(Title of credit).***
- Qiimaley : waxaa loola jeedaa lacag-u-yaal kasta ama wax lacagta bedeli kara sida Jeegga.
- Sanduuq – ammaan: waxaa loo jeedaa abxad xiran oo lagu xafido wixii la doono, Bankigana loo dhiibto ***(cassetta securezza).***
- ***Miisaaniyadda Ganacsigu:*** waxaa weeye (***Balance of payments*** ), xiriirka ganacsi ee dhexmara Punland iyo Dalalka kale ***( inports and exports ).***
- ***Raasumaalka Bankiga ( Capitol):*** waxaa weeye hantida joogtada ah ee Bankiga loo gaaryeeley.
- ***Dhitada isku dhowridda ( reserve fund):*** waxaa weeye hanti ixtiyaadi ah oo lagu ilaaliyo Raasumaalka Bankiga.

## Qaybta 2aad
## Asaaska iyo ujeedada bankiga.
### *Qodobka 2aad.*
### *Jiritaanka & shaqooyinka Bankiga.*

Waxaa la asaasay Banki.

Kaas oo la yiraahdo Bankiga Dawladda Puntland, waxaana loo soo gaabin karaa Bankiga Puntland ama (BDP).
Bankiga Puntland waxaa lagu xakumayaa sharcigan.
Bankiga wuxuu qabanayaa nooc kasta oo adeeg Banki dawladeed fuliyo, wuxuu awood u leeyahay inuu maamulo lacagta dalka iyo qiimaleyda kale, habeeyona noocyada adeegyada bankiga, amaahda, iyo inuu maamulo kayd-dibadeedka dawladda.

### *Qodobka 3aad*
### *Ujeedooyinka muhiimka ah ee Bankiga.*

Shaqooyinka & dhaqdhaqaaqa Bankigu waxay ku salaysan yihiin ujeedooyinka xoojinaya deganaanshaha lacagta, joogteynta qiimaha lacagta ee dalka gudihiisa iyo dibaddiisa, horumarinta xaaladaha wax-isku-bedelka iyo deymanka ee ku saabsan koritaanka dhaqaalaha dheelli-tiran ee dalka.
Bankiga ma khuseeyaan shuruucda Shirkadaha iyo Bankiyada kale ee Dalka.

### *Qodobka 4aad.*
### *Sharciga & Goobta shaqada Bankiga.*

Bankigu waa hay'ad madax bannaan oo isbedel joogto ah leh.
Bankigu waa hay'ad Maaliyadeed & adeeg leh shakhsiyad qanuuni ah, waxaa lagu dacweyn karaa waxna uu ku dacweyn karaa magaciisa . wuxuuna leeyahay awood wax kasbasho, hayn, siideyn iyo la macaamilka hantida kale ee faa'iidada leh kuna habboon ku xirnaanta bankiga, sida la wareegidda iyo xayiraadda hantidii hore ee bankiyaddii Soomaaliyeed. ( Bankiga dhexe ee qaranka, BGKS iyo BHS).
Xarunta shaqo ee bankigu waa Garowe, haddiise dawladdu u baahato wuxuu si ku meel gaar ah xafiis-madaxeed uga furan karaa meel kasta oo ka mid ah Puntland ama dalka dibaddiisa.

## *Qodobka 5aad.*
## *Canshuur La'aan ( Duty Exemption)*

Maadaama uu hayo xilligan shaqadii Bangiga dhexe, ma jirto wax canshuur ah oo ku waajibtay Bangiga Puntland, isna ma samayn karo wax ganacsi ah oo dheefi ugu jirto.

## *Qodobka 6aad*
## *Hawl-gelinta Saraakiisha Bangiga*

Bangugu wuxuu hawl-gelin karaa Saraakiisha, Shaqaalihiisa iyo wakiilada Bangiga, isaga oo ku qaadanaya Mushahar ama Gunno ku habboon wax qabadkooda, wuxuuna ku maamulayaa Xeerka Guud ee Shaqaalaha Bangiga.

# Qaybta 3aad
# Hantida Bangiga

## *Qodobka 7aad*
## *Raasumaalka iyo Dhitada isku dhawridda*

1. Raasumaalka joogtada ah ee Bangigu waa US$ 1,500,000 (hal milyan iyo bar Dollar) lacagtaas oo ay bixisay Dawladdu, waana la kordhin karaa.
2. Dhitada ixtiyaadiga ah ee Bangigu waa kala barka Raasumaalka Bangiga, ee ku xusan faqradda 1aad ee isla qodobkan, iyadoo lagu bilaabayo Sh.So. 100,000,000 (boqol milyan) oo Dawladdu bixinayso, iyada oo sanad walba lagu biirinayo Macaashka Bangigu helo Nuskiis (50% of the net profit).
3. Dhammaan Hantidii hore ee ay lahaayeen Bangiyadii Soomaaliyeed sida (BG&KS, Bangigii Dhexe iyo BHS) waxaa lagu wareejiyey BDP.

## *Qodobka 8aad*
## *Ku Talogalka Faa'iidada Bangiga*

Macaash Sanadeedka Bangiga waxaa loo qaybinayaa sidatan :

- 50% ama Nus waxaa lagu biirinayaa Dhitada ixtiyaadiga ah ee Bangiga.
- Nuska kalena waxaa iska leh Dawladda, haddii ay Dawladdu deyn ka qabto Bangiga waxaa lagu daboolayaa deyntaas.

Haddii ay Faa'iido soo bixi weydo Dawladda ayaa daboolaysa Saamiga ixtiyaadiga ah, iyada oo bixinaysa in u dhiganta tii lagu biiriyey Sanadkii hore. Haddii guud ahaan uu Bangigu khasaaro waxaa kabaya Dawladda, wuxuuna Bangigu ka celinayaa hantida lagu kabay Faa'iidada ugu horreysa ee uu helo.
Macaash-sanadeedka saafiga ah ee Bangiga waxaa jaangoynaya Bangiga, iyadoo la kala jarayo Macaashka weyn (gross income) iyo Kharashka dhow (current expense) oo ay ku jirto Kharashka daabacaadda qiimeleyda, qiime dhaca hantida (depreciation of assets), deynta xumaan karta (doubtfull depts), kabidda shaqaalaha iyo wixii kale oo uu u arko lama huraan.

**Qaybta 4aad**
**Maamulka Bangiga**

## *Qodobka 9aad*
## *Xubnaha Maamulka Bangiga*

Xubnaha Maamulka Bangigu waxay ka kooban yihiin :

- Guddoomiye
- Agaasime Guud

## *Qodobka 10aad*
## *Guddoomiyaha Bangiga*

Guddoomiyaha Bangigu waa Sarkaalka ugu sarreeya maamulka Bangiga, wuxuuna fuliyaa Siyaasadda iyo Go'aamada Dawladda ee ku wajahan Bangiga.
Guddoomiyaha Bangigu maadaama uu yahay sarkaalka ugu sarreeya Maamulka Bangiga wuxuu leeyahay awoodaha soo socda :

- Wuxuu metelaa Bangigu xiriirka uu la leeyahay Hay'adaha kale.
- Wuxuu metelaa Bangiga qof ahaan ama Guddi ahaan xaalad kasta oo sharci ah oo Bangiga khuseysa.
- Wuxuu wax ka saxiixaa Qandaraasyada, Heshiisyada, Lacagaha iyo Dammaanadaha Bangigu uu galo ama soo saaro, wuxuu kale oo saxiixaa Warbixinada, Xisaab-xirrada, Caddaymaha Maaliyadeed, Qoraallada Hay'adaha kale loo gudbinayo iyo dhammaan dukumentiyada kale ee Bangiga ka khuseeya dhan kasta.
- Wuxuu Wakiishaa Awoodihiisa ku cad faqradda 1aad, xiriirna la leh a, b, & c ee isla qodobkan Saraakiisha kale ee Bangiga.
- Wuxuu xaq u leeyahay ka qayb-galka shirka Golaha Wasiirada ee khuseeya dhammaan arrimaha ku saabsan Dhaqaale iyo Maaliyadeedba.
- Haddii Guddoomiyuhu maqan yahay ama hawl-gab noqdo sabab kasta, waxaa si ku meelgaar ah xilkiisa usii wadaya Agaasimaha Guud ee Bangiga.
- Waxaa kale oo ka mid ah Awoodihiisa :
  soo jeedinta Raasumaalka Bangiga.
  Jaangoynta Khidmadaha Adeegyada Bangiga.
  Jaangoynta Dulsaarka Amaahda.
  Ansixinta Miisaniyad-sanadeedka Bangiga.

## *Qodobka 11aad*
## *Agaasimaha Guud ee Bangiga*

Agaasimaha Guud ee Bangigu wuxuu Mas'uul ka yahay :

- shaqo-maalmeedka iyo hawl-gallada Laamaha Bangiga.
- Kormeerka iyo talo siinta shaqaalaha Bangiga.
- Qabashada shaqooyinka kale ee Guddoomiyuhu u Wakiisho.

Guddoomiyaha Bangigu wuxuu u magacaabi karaa mid ka mid ah Saraakiisha Bangiga in uu si ku meel-gaar ah u fuliyo xilkii Agaasimaha Guud ee Bangiga markii uu maqan yahay, ama uu hawl-gab noqdo sabab kasta, isagoo ogeysiinaya Madaxweynaha.

## *Qodobka 12aad*
## *Waxyaalaha ka reebban Xubnaha Maamulka Bangiga*

Ma noqon karo Guddoomiye Bangi ama Agaasime Guud qof isla waqtigaas ah :
Xubin ka tirsan Golaha Wakiilada Puntland, ama Golaha Wasiirada.
Agaasime, Sarkaal ama shaqaale ka tirsan Bangi ama Hay'ad deyn-bixineed oo hoos timaada sharciga Bangiga Puntland.
Guddoomiyaha, Agaasimaha guud ama qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha Bangiga waxaa laga qaadayaa xilka uu hayo, haddii ay ku caddaato :

- In uu ku sifoobo sababaha xilka ka reebaya ee ku cad faqradda 1aad ee qodobkan.
- In uu musallifay ama bixin kari waayey deyn lagu leeyahay ama uu isku dayo in uu fududeeyo dad deyn bixin waayey ama musallifay, isaga oo ku dabaqaya sharciga Bangiga Puntland.
- In uu shirka la yahay Bangiga deyn ka qaba isaga oo adeegsanaya Dakhliga kasoo gala Bangiga.
- In uu shaqada gudan waayey sabab kasta.

## *Qodobka 13aad*
## *Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud ee Bangiga*

Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud ee Bangigu waxay xaq u leeyihiin :

- In ay ka mid noqdaan Guddi kasta oo Dawladdu u magacawdo arrimaha la xiriira Lacagta, Bangiyada, Dhaqaalaha iyo Maaliyadda.
- In ay ka qayb galaan Urur kasta oo Maaliyadeed oo Dawladda Puntland xubin ka tahay.
- In ay la shaqeeyaan Hay'ad kasta ee Maaliyadeed oo Dawladda ama Bangiga Puntland uu saami ku leeyahay.
- In ay ka shaqeeyaan hawl kasta oo Madaxweynuhu u diro oo khuseysa arrimaha Maaliyadda, Bangiyada iwm.

*__Qodobka 14aad__*
*__Gunnooyinka Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud ee Bangiga__*

Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud ee Bangigu waxay leeyihiin Mushahar ama Gunno kusoo baxda wareegto uu soo saaro Madaxweynuhu.
Khidmadda Shaqaaluhu waa 5% Dakhliga Dawladda ee Bangigu qabto, waxayna jireysaa ilaa ay daboolanto hantida ku xusan qodobka 7aad, Bangiguna xoogeysto.

*__Qodobka 15aad__*
*__Dhawrista Sirta Bangiga__*

Marka laga reebo shaqo Maalmeedka caadiga ah ee Bankiga, ama shaqo sharcigu ka codsado Bankiga, waxaa ka reeban Guddoomiyaha Bankiga, Agaasiamaha guud, Saraakiisha Bankiga iyo qof kasta oo xiriir shaqo la leh Bankiga in uu fidiyo sir Bankigu leeyahay.
Qofkii ku xad gudba qodobkan waxaa lagu qaadayaa ciqaabta ku cad Xeerka ciqaabta ee Dawladdu ku dhaqanto & qodobka Ilaalinta sirta rasmiga ah ee Dawladda.

**Qaybta 5aad.**
**Lacagta Bankiga.**
*__Qodobka 16aad.__*
*__Lacagta Bankiga Puntland__*

BDP wuxuu ku shaqeynayaa lacagtii Soomaaliga ahayd ee Dalka ka jirtey burburkii ka hor, soona kala baxday :

- Sh.So 50 1987
- " " 100 1987
- " " 500 1989
- " " 1000 1990

Bankiga keliya ayaa xaqa u leh in uu soo saaro Qiimaleyda Bankiga, si uu shaqadaas u hirgeliyona wuxuu raacayaa shuruucda Dawladdu u dejisay arrintaas.
Awoodda keydinta iyo ka ganacsiga lacagta Dalka waxaa iska leh oo keliya Bankiga.

**Qaybta 6aad.**
**Xiriirka debadda.**
***Oodobka 17aad.***
***Kaydka Dibadda.***

Bankigu wuxuu joogteeyaa in la helo kayd dibadeed ku salaysan ujeeddooyinka Bankiga ee dhinaca wax is-dhaafsiga dibadda, keydkaasina wuxuu noqon karaa:

- Noocyada Dahabka iyo Silfarka.
- Sarrifyada bedelma ee dibadda ku qaameysa.
- Codsiyada ama kaydadka Bankiyada dhexe ee dibedda.
- Dukumentiyada ama qalabka kale ee caadi ahaan loo isticmaalo wax ku bixinta ama wax-isdhaafsiga caalamiga ah.
- Lacagta waraaqaha ah iyo tan jajabka ah bankigu doortay
- Dammaanadaha ganacsiga loo cayimay, & sarrif-dibadeedyada bedelma, kuwaas oo ay dammiinteen Hay'ado Maaliyadeed caalami ah ama dawlado, laguna bixinayo muddo aan ka badnayn 3 sano.
- Amaah-wade kasta oo dulsaar yeelan kara oo ay aqoonsan tahay Hay'adda Lacagta Aduunka ( IMF).

***Oodobka 18aad.***
***Isticmaalka Dahabka & Silfarta.***

Bnakigu wuxuu soo degsan karaa, dhoofina karaa, iibin karaa, gadan karaa ama xataa ku ganacsan karaa nooc kasta oo ka mid ah Dahabka iyo Silfarka taas oo waafaqsan shuruudaha dawladdu u dejisay arrintaa iyo heshiisyada caalamiga ah ee ay Puntland xubin ka tahay ama ogolaatay.

***Oodobka 19aad.***
***Isticmaalka Sarrifka Dibadda.***

Bankigu wuxuu wax ku iibin karaa, ama wax ku gadan karaa sarrifka dibadda xaalad waafaqsan shuruudaha dawladdu dejisay arrintaas, iyo heshiisyada calamiga ah ee Puntland xubin ka tahay ama ogolaatay.

***Oodobka 20aad.***
***Haynta Dahabka,Silfarka, Sarrifka Dibadda.***

Bankigu wuxuu hayn karaa Dahab & Silfar nooc kasta iyo dheelli-tir xisaabeed haraa ah (Balance) oo ku cayiman lacagaha dibadda ama halbeeg-xisaabeedyada adduunka laga aqoonsan yahay, wuxuuna bankigu ku haynayaa qolalkiisa xooggan ee banki dhexe oo dibadeed , hay'ad Maaliyadeed caalami ah ama wakiiladiisa debadda jooga, bankigu wuxuu xisaabaha uu hayo ku maal-gelin karaa haraaga saamiyada suuqyada sarrifka lacagaha qalaad.

## *Qodobka 21aad*
## *Hay'adaha Bankigu kula Macaamili karo sarrifka Dibadda.*

Bankigu wuxuu macaamiil sarrif debadeed la samayn karaa :

- Banki kasta oo idman.
- Dawlad.
- Hay'ad dawladi leedahay, lana caddeeyey.
- Bankiyo dhexe ee dibadeed, ama hay'ad maaliyadeed dibadeed.
- Wakaalado dawlado leeyihiin.
- Hay'ad-maaliyadeedyo caalami ah.

## *Qodobka 22aad.*
## *Ilaalinta Sarrifka.*

Bankigu wuxuu maamulaa ilaaliyaana sarrifka lacagaha ee dalka Puntland, taas oo ku salaysan shuruucda dawladdu arrintaas u dejisay.

## *Qodobka 23aad.*
## *Heshiisyada bixinta Lacagaha.*

Bankiga waxaa lagala tashadaa dhammaan wadahadallada dawladda ee khuseeya heshiisyada bixinta lacagaha dibadda.
Bankiga ayaa maamula heshiisyada bixinta dibadda ee dawladdu geleyso.

## *Qodobka 24aad.*
## *Wakiil-sanadeedka wax- is- dhaafsiga dawladda & hay'adaha Maaliyadda Adduunka.*

Bankiga waa wakiilka xiriiriya dawladda wax-is-dhaafsiga dawladda Puntland & Hay'adaha maaliyadda adduunka ee Dowladda Puntland xubin ka tahay sannad kasta.

## *Qodobka 25aad.*
## *Kayd-haynta.*

Bankigu waa kayd-hayaha lacagta Puntland isticmaasho iyo lacagaha iyo qiimeleyda kale ee Hay'adaha maaliyadda caalamka ee Puntland xubin ka tahay.

**Qaybta 7aad.**
**Xiriirka Bankiyada.**
***Qodobka 26aad.***

Bankigu wuxuu xisaab u furi karaa ama hanti u hayn karaa banki kasta oo idman, sida isu fududaynta hawlaha bankiyada, is-dhaafsiga wararka IWM.

***Qodobka 27aad.***
***Adeegga Gaarka ah ee Bankigu u sameeyo Bankiyada kale Rediscount (Dib u sarrifasho).***

Bankigu wuxuu ka iibsan karaa bankiyada kale ee baahi lacageed haysato Gashiyada ( cambiale) ama biilasha la kala bedesho iyo dukumamentiga deynta ee saxiixooda lagu kaloonaan karo, kuna muddeysan 180 maalmood laga bilaabo mudada la qiime dhimay ( rediscount).
Waxaa kale oo habkan oo kale lagu dhaqi karaa dukumentiga ama haynta :

- Soo dejinta & dhoofinta badeecadaha.
- Xafidaada alaabta aan doorsoomeyn ee caymis ku jira, lana dhigay bakhaarro lagu kalsoon yahay bankiguna ogolaada.
- Alaabta Warshadaha & Beeraha oo bankigu u arko in ay wax tarayso dhaqaalaha dalka mudadeeduna aanay ka badnayn 270 maalmood.

Habkani wuxuu ka mid yahay adeegyada bankigu u fidiyo bankiyada kale, inkasta oo faa'iidona ugu jirta.

***Qodobka 28aad.***
***Deynta.***

Bankigu wuxuu bixin karaa deyn ama horumarin ku saleysan muddo cayiman, mudadaas oo aan ka badnayn 6 (lix) bilood, wuxuuna siin karaa banki Idman, iyada oo rahan ay ka tahay:

- Alaabta deynta loo bixin karo ee ku cad qodobka 24aad, ee sharcigan, dammaanad ay ballan-qaaday dawladdu.

***Qodobka 29aad.***
***Xaaladaha Amaahda.***

Bankigu wuxuu go'aan ka gaari karaa shuruudaha lagu kordhin karo amaah la siiyey Bankiga idman, sida heerka khidmadda shaqo ee la saarayo dib u sarifashada ( rediscount).

## *Qododka 30aad.*
## *Shuruudaha Keydka.*

Bankigu wuxuu weydiisan karaa bankiyada idman inay u joogteeyaan xisaabta ugu yar ee kaydkooda bankiga u yaal ah in ay noqdaan kaydka & Raasumaalka bangigaas.
Iyada oo lagu dabbaqayo shuruucda kale ee jirta, bankigu wuxuu caddeynayaa saamiyadda kala duwan ee raasumaalka bankiga, wuxuu kale oo qeexayaa nooca xisaabta & inta kayd ahaan loo rabo in banki walba hayo, saamiyadaasi waxay halbeeg u noqonaayaan bankiyada Puntland oo dhan.
Caddeyn ama isbedel kasta ee kaydka ee loo baahan yahay, wuxuu dhaqan gelayaa marka Bankigu ogeysiin siiyo bankiyada kale ee la doonayo in ay habkan ku dhaqmaan.
Bankigu wuxuu xaq u leeyahay inuu saaro khidmad shaqo oo ganaax ah banki kasta oo ku guul darreysta inuu hirgeliyo habkan, ganaaxaasina waa in aanu ka badan 1/5% maalintiiba, mudada is-dhinkaasi socda.

## *Qodobka 31aad.*
## *Ilaalinta Amaahda Bankiyada la siiyo*

Markuu u arko lagama maarmaan bankigu wuxuu soo saari karaa amarro iyo talooyin ku saabsan deynta & horumarinta uu siiyey bankiyo kale waxayna noqon karaan:

- Sababaha aan amaah lagu bixin karin.
- Mudada ugu badan ee Amaah lagu siin karo, nooca iyo waxa rahan looga rabo iyo hantida ugu yar ee kayd looga rabo.
- Xaddiga Amaahda, Horumarinta ama Maalgelinta ama Wadarta caddadka taagan.

Amarada bankigu waa lagama noqdaan, waxaana si isku mid ah loogu gudbinayaa dhamaan bankiga idman ee ku hawlan amaah-bixinta, amarkanina khuseeyo, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

## *Qodobka 32aad.*
## *Ilaalinta Amaahda la siiyo hay'adaha Maaliyadda ee Cayiman*

Bankigu markuu u arko lagama maarmaan wuxuu soo saari amarro lagu xakameynayo amaahda, horumarinta, iyo Maal-gelinta la siiyo hay'adaha Maaliyadda ee Ciyiman, sida kaltanka lagu bixinayo amaahda, kordhinta muddada amaahda, khidmadda adeega bankiga, IWM.
Amarrada bankigu waa lagama noqdaan waxaana si isku mid ah loogu gudbinayaa dhamaan hay'adaha Maaliyadda ee amaahda ku shaqada leh ee amarkani khuseeyo iyo taarikhda hawl-galka, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee dowladda.

## *Qodobka 33aad.*
## *Wararka Bankiga.*

Banki ama Hay'ad-maaliyadeed kasta wuxuu bankiga u soo gudbinayaa dhamaan wararka ay Bankiga ka codsadaan.
Bankigu wuxuu faahfaahinayaa wararka ku cad faqradda 1aad ee qodobkan, waxaa reeban in la faafiyo sir-maaliyadeed qof ama shirkadeed haddii aan marka hore laga haysan ogolaansho qoraal ah oo arrintaas khuseeya.

## *Qodobka 34aad.*
## *Baarista Bankiga*

Bankigu markuu u arko lagama maarmaan wuxuu kormeeraa bankiyada idman buugaagtooda, xisaabahooda, waxaana nuqul ka mid ah natiijada baarista loo gudbinayaa bankiga la baaray.
Agaasime iyo sarkaal kasta waxaa ku waajib ah inuu usoo bandhigo sarkaalka baarista ee bangiga dhammaan wararka xisaab-socodyada iyo buugaagta uu ka codsado baaristooda.

## *Qodobka 35aad.*
## *Awoodaha Bankiga Baarista kadib.*

Haddii bankiga baaristiisa ku helo khaladaad lagu kacay, wuxuu bankigu siinayaa bankiga la baaray amarro ah in uu saxo khaladkiisa dibna aan loogu noqon mar dambe.
Amar dambe laguma soo rogi karo, haddii an bankiga la baaray la siin fursad uu afkaartiisa ku soo bandhigo.
Haddii loo wakiisho, ama isaguba go'aansado, bankiguwuxuu bedeli karaa ama baabi'in karaa amar lagu soo saaray sida ku cad faqradda 1aad ee isla qodobkan, wuxuuna ku saleynayaa sida ay ula habboonaato.

## Qaybta 8aad.
## Xiriirka Bankigu la leeyahay Dawladda & Laamaheeda.
### Qodobka 36aad.

Bankigu waa hay'adda keliya ee Dawladda & unugyada dadweynaha uga wakiilka ah arrimaha Maaliyadda , Bankiyada, Sarrifka & lacag-bedelashada, iyada oo aan cidna laga faquuqayn bankigu waa:

- Kayd hayaha iyo sarriflaha dawladda & Unugyada dadweynaha, wuxuuna hawshan u wakiilan karaa banki kale markuu la tashado dawladda iyo Hay'adaha Dawladda
- Wuxuu furaa kuna shaqeeyaa xisaabaha dawladda & hay'adeheeda, ka dib markuu heshiis arrintaas kala galo dawladda iyo Unugyada dadweynahaba.
- Deynta Dawladda oo xisaabta laga jaro
- Wuxuu dammaanad ahaan u hayaa sanduuqyada Ammaanka.
- Wuxuu iibiyaa, gadaa, gudbiyaa ama aqbalaa Jeegagga, biilalka sarrifka & dammaanadaha.
- Wuxuu ururiyaa raasumaalka iyo faa'iidada Dawladda ama unugyada dadweynuhu ka helaan ganacsi ama dulsaar.
- Wuxuu gadaa,iibiyaa, wareejiyaa, ama hayaa Dahabka, Silfarka, iyo lacagaha qalaad.

Haddii aanay ka hor imanayn faqradda 1aad ee qodobkan, bankigu wuxuu Hay'adaha dadweynaha u ogolaan karaa inay la macaamilaan bankiyada ganacsi, bankiga waxay dawladdu kala tashaneysaa ka hor inta aanay gelin heshiis bixin deyn ama lacag qalaad ah, ama ay bixineyso damaanad ku cayiman lacag Somali.

### Qodobka 37aad.
### Amaahda Bankiga ee Dawladda & hay'adaheeda.

1. Bankigu wuxuu Dawladda siin karaa deyn aan ka badnayn 3 bilood dakhliga ku talo galka ah ee Miisaaniyadda Dawladda, kuna muddeysan 6 bilood, wuxuu kale oo bankigu Dawladda siin karaa Horumaris muddo gaaban ku soo daboolmaysa sida ku cad qodobka 38aad.
2. Tasiilaad kasta oo bankigu bixiyo waxaa raacaya korsaar ay dawladdu jaangoyneyso.

*Qodobka 38aad.*
***Horumarinta lagu Maal-geliyo hay'ad Maaliyadeed Caalami ah.***

Marka la filayo mucaawino dibadeed Bankiga wuxuu horumarin aan ka badnayn 50% lacagta la filayo siinayaa dawladda, marka arrimahaas oo dhan si fiican loo hubsado, horumarintaas waxaa Bankiga loo celinayaa isla marka lacagtaas la helo.
Bankigu wuxuu horumarin siiyaa Dawladda, si ay ugu bixiso saamiga kaga soo hagaaga qaaraanka loo gurayo hay'adaha caalamiga ah ee Dawladdu xiriirka la leedahay.

*Qodobka 39aad.*
*Maal-gelinta la siiyo Hay'ad maalgelineed cayiman.*

Bankigu wuxuu iibiyaa ama gadaa saamiyada hay'adda maaliyadeed cayiman ee Dawladdu mas'uul ka tahay, laguna maal-geliyey horumarinta dhaqaalaha dalka, waana in aanay ka badnaan 50% hantida Raasumaalka Bankiga.

*Qodobka 40aad.*
*La Talinta Dawladda.*

Bankigu wuxu kala taliyaa Wasiirka Maaliyadda arrimaha ay ula muuqato in lagu gaari karo ujeeddooyinka Bankiga ee ku cad qodobka 3aad ee sharcigan. Wasiirka Maaliyadda & golaha Wasiiradu waxay ka codsan karaan Bankiga in uu kala taliyo arrimaha ku saabsan lacagaha, Sarrifka, Deymanka IWM.

**Qaybta 9aad.**
**Adeegyada Bankiga ee Dadweynaha.**
*Qodobka 41aad.*
*Socodsiinta hawlaha Bangiga ee ganacsi.*

Iyadoo la tixgelinayo baahida loo qabo in adeegyada guud ee Bangiga la gaarsiiyo Dadweynaha, Bankigu wuxuu awood u leeyahay fulinta hawl-bankiyeed kasta ee dadweynaha & hay'adaha gaarka ah ee dalku uga baahdaan waxaana ka mid ah adeegyadaas :

- In uu Iibiyaa, gadaa, bedelaana, lacagaha kala duwan.
- Wuxuu sameeyaa waraaqaha L/cyada iyo dammaanadaha.
- Wuxuu bixiyaa biilal iyo xawilaad iyo isu- gudbinta lacagaha
- Marka looga baahdo wuxuu qaban karaa sanaadiiqda Ammaanka.

### *Qodobka 42aad.*
### *Abuurid qayb ganacsi ee Bankiga.*

Si bulshada looga haqabtiro adeegyada Bankiga, kadib talo soo jeedinta Guddoomiyaha Bankiga & ogolaanshaha Golaha Wasiirrada waxaa dekreeto Madaxweyne lagu abuurayaa Qayb Ganacsi oo si gaar ah ugu xilsaaran fulinta iyo casriyeynta adeegyada ganacsi ee dadweynaha loo qabto.

### *Qodobka 43aad.*
### *Qaab-dhismeedka qaybta ganacsiga ee bankiga*

Qaybta ganacsiga ee bankigu waxay yeelanaysaa aqoonsi u gaar ah, Xasaabaadkeeda iyo shaqaalaheduba waa ka goonni bankiga hawlihiisa, waxay kale oo yeelanaysaa raasumaalkeeda, deynta ay mas'uulka ka tahay (Liabilities ) Kaydka, Maamulka, Xuquuqda, Dammaanadaha, Keydinta, Lahaanshaha IWM.

### *Qodobka 44aad.*
### *Dhiirri- gelinta Dhaqaalaha Xorta ah.*

Marka ay habboonaato qaybta ganacsiga ee bankiga iyo Laamihiisa qaarkood, waxaa loo bedeli karaa Banki ganacsi oo saamiley ah raasumaalkiisuna yahay wadaag ka dhexeeya:

- Dowladda Puntland.
- Maal-qabeen Soomaaliyeed.
- Maal-qabeen ajnabi ah, iyadoo taas loo waafajinayo sharciga maalgelinta ee Wasaaradda Maaliyadda ee Puntland. Talaabadaasi waxay qayb ka qaadanaysaa dhiirri-gelinta dhaqaalaha suuqa xorta ah.

## Qaybta 10aad.
## Warbixin-sannadeedka Bankiga.

### *Qodobka 45aad.*
### *Sannad-maaliyadeedka Bankiga.*

Sannad-maaliyadeedka bankigu waxay ka bilaabanaysaa 1da Janaayo, waxayna ku eg tahay 31ka Disember, xisaabaha bangiga waxaa la xirayaa dhamaadka sannad-maaliyadeed kasta.

## *Qodobka 46aad.*
## *Bandhig-xisaab-xir sannadeedka Bangiga.*

Afar bilood gudohood xisaab-xir sannadeedka bangiga waxaa loo gudbinayaa Wasiirka Maaliyadda, xisaab-xirka faa'iidada iyo Khasaaraha Bankiga, taas oo ay xaqiijiyeen baarayaal ay Dawladdu u xilsaartay.

## *Qodobka 47aad.*
## *Faallada Dhaqaalaha iyo tira koobka Bankiga.*

Sannad-maaliyadeed kasta Bankigu wuxuu u soo bandhigaa dawladda faalada shaqaale iyo tira koobyada kala duwan ee bangigu ururiyay sannadka dhexdiisa guud ahaan gaar ahaanna kuwa soo socda:

- Ka warbixinta miisaaniyadda Ganacsiga (balance of payments ), taas oo loola jeedo xaaladda wax is-dhaafsi ee aynu la leenahay dalalka kale.
- Xaaladda amaaheed iyo deymanka bankiyada idmani bixiyeen.
- Heerka sicir bararka.
- Talo soo jeedin wax ka qabadka arrimahaas.

## *Qodobka 48aad.*
## *Daabacaadda Warbixinnada*

Bankigu wuxuu daabacaa warbixinta sannadka taas oo ah dheelli-tirka faaiidada iyo khasaaraha bankiga ayna saxiixaan baareyaal ay Dawladdu soo xilsaartay.

## *Qodobka 49aad.*
## *Baarista Bankiga.*

Bankigu wuxuu leeyahay qayb agaasinkiisa ka mid ah oo qaabilsan baarista hawlaha bankiga iyo xisaabihiis.
Madaxweynuhu markuu la tashado Wasiirka Maaliyadda, ayna ogolaadaan golaha wasiirradu, wuxuu sannad kasta magacaabaa dhawr xubnood oo ah ku xeel-dheerayaal xagga xisaabaadka ama ( external chart & accounting ama revisori dei conti) si ay u hubiyaan faaiidada & khasaaraha Bankiga, waxayna caddeyaan saxnimada Xisaab-xir-sanadeedka bankiga.
Madaxweynaha ayaa jaangooya khidmadda shaqo ee baarayaasha Bankigu siinayo inta ay howshaasi jirto.

*Qodobka 50aad*
*Baabi'in*

Qaanuun kasta oo aan waafaqsanayn ama la socon karin sharcigan waa la baabi'iyey (abrogated). Dhamaan cidda ay khuseyso waxaa la faryaa in ay arkaan sharicgan in uu yahay qaanuun Dowladeed (Puntland State).

*Qodobka 51aad*
*Dhaqan-galka Sharcigan*

Qaanuunkan wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiiladu ansixyo Madaxweynaha Dowladda Puntlandna saxiix, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Cabdulaahi Yuusuf Axmed

Madaxweynaha Dowladda Puntland ee Soomaaliya